

Febrile Convulsions (Somali)

Qandhada lala jareeyo ee afka ingiriiska lagu dhaho



Qandhada lala jareeyo (sidoo kale loo yaqaan qandhada lala suuxo ama qalalka wadata) waxaa sababa isbeddel degdeg ah oo ku yimaada tembarajarka/heerkulka jirka ee ilmaha waxayna la xiriirtaa qandho.

Waxay badanaa ku dhacdaa carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood iyo 6 sano jir. Qiyaastii 1 ka mid ah 30-kii carruur ayaa qandho daraadeed jareys yeelan doona sidii qof qarqaryo heyso oo kale.

Qandhada lala suuxo waxay noqon kartaa mid laga naxo oo laga xumaado in la arko laakiin dhibaato uma keeneyso ilmahaaga.

Dhaawac maskaxeed ma keeneyso mana saameenayso korriimada ilmahaaga.

Calaamadaha lagu garto

Waxa laga yaabaa in ilmahaagu qarqaryo/jareys dareemayo haddii:



- jirkoodu oo adkaado
- Hadii ay gacmaha iyo lugaha ay noqdaan kuwo jareynaya



- hadii ay madaxooda dib bay u celiyaan
- hadii ay indhaha dib u rogogaan oo un qeybta cad kaliya la arkayo.

Ilmahaagu ma awoodi doono inuu kuu jawaabo haddii uu dareemayo gariir qandho ama waxa aan u naqaan qarqaryo. Gariirka waxa uu socon karaa dhowr daqiiqo (badanaa wax ka yar 5 daqiiqo waana dhif inay ka badato 15 daqiiqo).

Waxa la baahan yahay in sameeyo marka ilmahaagu gariirayo

- Ma awoodi kartid inaad joojisid gariirka inta uu socdo.
- Hubi in ilmahaagu uusan saarreen meel uu kasoo dhici karo ama uu isku dhaawaci karo.
- **Wac lambarka Seddexda Ebar (000) ee ambalaasta.**
- Dhinac u seexi ilmahaaga marka gariirku dhamaado.
- Sidii qof hurdeysan oo lulmoonaya oo kale ayuu inta badan dareemi doonaa ilmahaaga.

Daryeelka gariir ka dib

Ilmahaaga waxa laga yaabaa in uu marxad aan caadi eheen kujiro maalin iyo labo laakiin taasi wuu ka bixi doonaa. Daawooyin looma baahna in la siiyo marka laga reebo paracetamol ama ibuprofen (raac tilmaamaha si aad u ogaatid qiyaasta lagu taliyey).



Mararka qaarkood carruurta leh qandhada jareyska leh ee aan u naqaan qarqaryo, gaar ahaan mida waqti dheer socota, waxay u baahan doonaan in isbitaalka xaaladooda lagula socdo. Inta badan, looma baahna in loo sameeyo ballan labaad oo soo noqosho ah markay hal mar qabato qandho jareys leh.

Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

Isla markiiba wac lambarka Saddexda Ebar (000) haddii ilmahaagu uu jareynayo.

Dhammaan carruurta waa in uu arko dhakhtar markay ku dhacdo qandhada lala jareeyo ka dib. Dhakhtarku waxa uu eegi doonaa tambarajarka/heerkulka ilmahaaga wuxuuna baari doonaa sababta keentay qandhada. Taasi waxay noqon kartaa in baaritaano la sameeyo, waxayna ku xiran tahay calaamadaha jirrada ee ilmahaaga.

Ka hortagga

Suurtagal ma aha in laga hortago qandhada wadata jarreyska maadaama ay taasi inta badan tahay calaamada ugu horeysa ee muujinaysa in ilmuhu uu jirran yahay.

Si kastaba ha ahaatee, waxyaabaha soo socda ayaa kaa caawin kara maareynta qandhada:

- paracetamol (Panadol) ama ibuprofen (Nurofen) ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan yaraynta tembarajarka/heerkulka oo ay ilmahaaga dareensiiso in yar oo roonaan ah (raac tilmaamaha ku qoran dhalada ama xirmada ay daawadu kujirto si aad u ogaatid qiyaasta lagu taliyay)
- hubi in ilmahaagu cabbo cabitaan badan
- dhar badan hau galin ilmahaaga.
- iska ilaali qubayska qabow ee laga yaabo in ilmahaagu si degdeg ah uu jirkoodu qaboow u noqdo.

Qandhada jarreyska leh ma waxay la macno tahay in ilmahaygu uu suuxdin qabo?

Qandhada jarreyska leh macnaheedu maaha in ilmahaagu qabo suuxdin. Xitaa haddii uu ilmahaagu yeesho qandhada jarreyska leh mustaqbalka, uma badna suuxdin yeesho.

Carruurta qaarkood waxaa laga yaabaa inay yeeshaan qandho leh jarreys mar labaad (ama saddexaad) markay qandho hadana qabato mar kale oo dambe. Uma badna inay suuxdin ku dhacdo carruurtaas.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha.

Resource ID: FS012 **Reviewed:** July 2022

Cudur-daar

Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay in loo isticmaalo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadhadalka lala yeelanayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka.

Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.